

**SHARCIYADA QALIN-JABINTA LOOGA BAAHAN YAHAY DUGSIGA SARE
FASALKA 2019**

AGAASIMAYAASHA GUDIGA SARE DUGSIYADA

Scott Pinkham, District I
Rick Burke, District II
Jill Geary, District III
Sue Peters, District IV, Vice President
Stephan Blanford, District V
Leslie Harris, District VI, Member At Large
Betty Patu, District VII President

AGAASIMAHA GUUD

Dr. Larry Nyland

Si aad u qalin-jabiso, una hesho shahaadada waxaa lagaa doonayaa in aad haysato shanta qodob ee hoos ku qoran:

1. DHIBCAHA UGU YAR WAA 21

Ka fiiri bogga labaad sida ay u kala baxsan yihiin dhibcahaas. Dhibacaha layska doonayo waa kuwa ugu yar marka loo eego wadarta fasalada qalin-jabinta iyo dhibacaha maadooyinka oo kala duwan muhiimka ah. Si aad diyaar ugu noqoto arimahan shaqada iyo jaamacadaba, waxa degmada ku dhiirigelinayaa ardaydu in aya qaataan maadooyin ka badan kuwa looga baahan yahay. Dugsiyada qaar ka mid waxay ardayda ku xiraaan dhibco ka badan 21ka dhibcood in lagu qalin- jabiyo. La soo xariir La-taliyaha dugsiga dhicbaha layska rabo.

2. ISKU CELCELINTA DHIBCAHA BUUNDADA WAA 2.0

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Seattle waa in ay haystaan 2.0 ama wixii ka sareeya isku celcelinta buundada iyo 2.0 ama wixii ka badan fasalada muhiimka ah (sida maadooyinka luqada Ingriisiga, xisaabta, taariikhda, iyo sayniska). Fiiri Siyaasada Agaasinka Gudiga Sare Dugsiyada qodobka 2415.

**3. IMTIXAANKA GOBOLKA- SHAHAADADA CILMIGA/AQOON GAARITAANKA
SHAQSIGA**

Fasalka 2019ka. Ardayda waxa looga baahanyahay in ay ku guulaystaan heerka qoraalka, akhriska, xisaabta iyo sayniska oo ku salaysan imtixaanka gobolka oo uu gobolku ansixiyo bedelkiisa ama loo casriyeeyo ardayda qaadata waxbarashada gaarka ah. Goorta ardayda ku guulaystaan dhamaan shuruudaha imtixaanka looga baahan yahay waxay helayaan shahaadada Certificate of Academic Achievement (CAA). Ardayda ku guulaysto qiimeeynta badalaada dadban waxay helayaan shahaadada Certificate of Individual Achievement (CIA). Shahaadadaha CAA/CIA waxay ku xusan yihiin qoraalka kaliya. Shahaadada ay ardaydu qaadanayaan waa isku mid.

4. QORSHAHA DUGSIGA SARE IYO WIXII KA DAMBEEYA

Gobolku waxa uu doonayaa in dhamaan ardaydu dugsiga sare leeyihiin qorshaha waxbarashada dugsiga sare iyo wixii ka dambeeyey. Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxaa laga rajeenayaa ardayda soo gelaya fasalka 9aad qorshe 5 sano ah oo ah 4 ta sano ee dugsiga sare iyo sanadka ku xigo. La-taliyaha dugsiga wuxuu ka cawinayaa ardayga si gaar-gaar ah qorshahaan. Wixii akhbaar ah ee dheeraad waxaad ka helaysaa: <http://www.k12.wa.us/GraduationRequirements/Requirement-HighSchoolBeyond.aspx>.

5. SHAQO BARASHO

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay ardayda ka doonaysaa in ay sameeyaan 60 saacadood oo shaqo barasho ah in taanay qalin-gebin waxaana loogu talagalay in ardaydu adeegsadaan aqoonta xirfadooda iyo cilmiga nololsha dhabta. La xariir si gaar ah dugsiga si aad u hesho akhbaaro gaar ah.

DUGSIYADA DADWEYNAHA SEATTLE

SHARDIGA U YAR EE DUGSIGA SARE LAGU QALIN-JEBIYO

MAADO	DHIBCO ¹	MAADOOYINKA SHARDIGA AH	XUSUUSNOW
Ingaliiska/ Luqada Ingaliiska	4.0	Horu-dhaca Suugaanta & Curiska Naxwaha 9A, 9B Sugaanta Aduunka iyo Curiska Naxwaha 10A, 10B Sugaanta Mareekanka iyo Curiska Naxwaha 11A, 11B Suugaanada lays bar-bardhigau iyo Curiska 12A, 12B	Maadooyinka ardayda ee fasalka 11 th waxaa lagu badali karaa maadada AP Luqada Ingaliiska iyo Naxwaha 1 & 2 ama IB Luqada iyo Suugaanta 11A & 11B ama IB Luqada iyo Suugaanta 12 A/B HL ama IB suugaanta 12 A/B HL. Maadooyinka fasalka 12 ardayda wuxuu ku badalan karaa AP suugaanta iyo naxwaha, IB Luqada ingaliiska 12A, 12B. Ardayga ku guulaysto qiimeeynta gobolka Heerka maadooyinka muhiimka ah ELA fasalka 11 wuxuu dooran karaa liiska kore ama liiska doorashada LA oo dugsiga bixiyo
Cilmiga Bulshaha (Taariikhda)	3.0	Taariikhda Aduunka 1, 2, 3 Taariikhda U.S. ee 11A, 11B Dowlada Mareekanka Taariikhda Gobolka Washington ²	Ardayda waa in ay dhameeystiraan fasalada sal-dhiga u ah qiimeeynta horumarka OSPI ee cilmiga bulshada fasalka koow-iyto-tobonaadka ama fasalka labo iyo tobnaadka. Maadooyinka taariikhda ee 2 iyo 3 waxay kaloo buuxin doonaan halka buundo ee Dhibaatooyinka Aduunka ee hada jira (WCP) ee layska rabo. Maadada Dawlada Maraykanka waxay buuxin doontaa .5 buundo ee bulshada ah ee layska rabo.
Xisaabta	3.0	Al-jabra I Jometrikada Al-jabra II* ama maadooyin ka sareey oo ku xigga	*Ardayda waxay dooran karaan in ay qaataan dhibcaha xisaabta oo loo ansixiyey raacsana qaabka xirfada shaqada, si ay ula kulmaano qalin-jabinta looga baahan yahay ee Al-jabra II, laakiin waxaa laga rabaa ogolaashaha oo ansixiyey waalidka/wakiilada iyo maamulka dugsiga sare. Fiiri akhbaaraha dheeraadka ah oo la xariira Xisaabta Sanadka Seddexaad.
Sayniska	2.0	Ka dooro madoyinka la ogol yahay ee la bixinayo	“Ugu yaraan waa in hal dhibac oo noqdaa labada dhibcod ee sayniska waa in oo yahay saynis shaybar wato’ WAC 180-51-060.
Barashada Shaqada	1.5	Ka dooro madoyinka la ogol yahay ee la bixinayo	Dhibcaha Waxbarashada Shaqada waxaa ka heli kartaa Maadooyinka Baarista ama qabanqaabin fasalada xirfada CTE kuwa kale lagu ogol yahay oo aan aheeyn qabanqaabin fasalada xirfada CTE. Fiiri la-taliyaha dugsiga warbixin dheeraad ah

Caafimaadka iyo Jimicsi Caafimaadka iyo Ciyaaraha Jir-dhiska)	2.0	Ka dooro madoyinka la ogol yahay ee la bixinayo 1.5 Waxbarashada Jirdhiska .5 Caafimaadka	Fulinta qaybaha (waxbarashada jirdhiska) waxa looga tanaasuli kara sababo khaas ah awgood sida curyaanimo ama ka qaybagal ciyaarokale ama sababa kale oo fasiraayo qodobka RCW 28A.230.050. . Arinto si kastaba ha ahaatee, Ardaygu waa inuu helaa aqoonta uu u baahanyahay ee maadada jir dhiska ama qaato maadada jimicsiga ama uu dhamaysto OSPI hore u marinta xaalada caafimaadka iyo jimicsiga. RCW 28A.230.50; WAC180-50-135; WAC392-410-136; WAC392-410-310; iyo WAC392-410-340. Ardaygu waa inuu dhameeyo u ogolaashaha qiimeeynta OSPI xaalada caafimaad ee xiliga dugsiga sare.
Fanka Farshaxanka	1.0	Farshaxank, Musikada ama Masraxa	Ka dooro korsooyinka fanka, muqalka iyo samaynta farshaxanka ama maadooyinka dhibcaha CTE courses. Fiiri la-taliyaha dugsiga warbixin dheeraad ah
Maadooyinka Doorashada	4.5	Luqada Aduunka iyo/ama madoyinka laga dooranayo kuwa kale	2-3 sano Luqada aduunka looga baahan yahay in aad dhigato ama aad gasho kuleejooyinka afarta sano.
WADARTA DHIBCAHA	21.0		Faylka rasmiga ee Gobolka WA wuxu tusayaa rikoodhka warbixinta fasalada aad qaatay, dhibcaha iyo fasalka.

1. Hal dhibic waxay la mid 150 saacadood oo waxbarasho ama dhamaystirka maadooyinka ama koorsooyin kale oo la Ogolaaday Ku Badalka Maadada Waxbarashada yahay. (WAC 180-51-050). Koorsooyinkaas la ogol yahay waxay qoran yihiin buuga wax liis garaynta maadooyinka dugsiga sare ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle.
2. Ardayda dhamaysted kuna guulaysta taariikhda gobolka tan dowlada loogama baahna in ay qaataan taariikhda Washington. Barashada Dastuurka Maraykanka iyo Gobolka Washington lagama tegi karo sida uu sharciga RCW 28A.230.170, laakiin way qaadan karaan koorsooyinka kale ee u dhigma oo uu ogol yahay digtoorka dugsiga. Taas waxa dheer, ardayda fasalada koow-iyto-banaadka iyo labo-tobanaadka ee ka soo bedeshay gobol kale ee haystey labo derajo ee maadada taariikha ee lagu qalin jebinayo, waxa laga yaabaa in laga daayo taariikhda Gobolka Washington.

TAXADAR: Ardayda aadeeyso jaamacadaha 4 sano ah, waxa loo baahan yahay koorsooyin ka badan kuwa lagu qalin jebinayo. Waxa kale oo dheer koorsooyin shaqo iyo qaadasahada imtixaanka u diyaargarowga jaamacada ee SAT ama ACT iyo weliba isku celcelin buundooyinka inta aad heshay. Ka hubi liiska jaamacadaha iyo kosulaarada dugsiyada sare wixii akhbaar dheeraad ah. Koleejada labada sano uma baahna koorsooyinka dheeraadka ee aan kor ku soo sheegnay. Si kastaba ha ahaatee, waxa xaqiiqa ah in ardayda ku qaata maadooyinka adadag dugsiga sare ay ka jaanis fiican xaga doorashada jaamacadaha kuwa kale.

KA TANAASULAADA AMA KA CAFINTA SHURUUDAHA QALIN-JABINTA DEGMADA DUGSIYADA SARE “WAIVER OF DISTRICT HIGH SCHOOL GRADUATION REQUIREMENTS”

1. Dhigashada afarta sano (fasalada 9-12) waa mid aad ugu muhimsan ka qalin-jabinta. Maamulaha dugsiga wuxuu ka tanaasuli karaa shuruudaha qalin-jabinta degmada ee shaqsiyaadka arday gaar ah goorta ay la adeeco waxbarashada iyo/ama sababo dhibaato adag oo dokumeenti leh.
2. Degmooyin gaar ah waxay ka tanaasulayaan shuruudaha looga baahan yahay qalin-jabinta shaqsiyaad arday gaar ah. Laakiin SHURUUDAHA GOBOLKA LAGAMA TANAASULAAYO (tusaale, lagama tanaasulaayo shuruudaha ugu yaraanta dhibcaha, Mashruuca Isku-keenida iyo Qorshaha Dugsiga Sare oo dheeraad ah) ilaa mooyee halka gobolka sharciga gobolka ogol yahay (tusaale, ka qalin-jabinta dhameeystiran IB Diploma, ka tanaasulaada dhibcaha Jimicsiga (Ciyaaraha qaabka jirka) oo keena curyaanimu, shaqaalayn ama aaminaadta diin, ama si tuus ah ugu qaybgalaayo ciyaaraha ama cilmiga sayniska ciidamada, ama tabar gaar ah ciidanka ama sababa kale oo suurtagal fiican).
3. Qaababka soo socdo waxaa loo isticmaalayaa ka tanaasulaada ama cafiska shuruudaha looga baahan yahay ka qalin-jabinta degmada:
 - ⇒ Ardayda dooneeyso ka tanaasulaada waxay u keenayaan warqad la-taliyaha dugsiga ayna soo saxiixayn waalidiinta ama wakiilada. Goorta ardayga gaaro da'da 18 jirka, ardayga ayaa saxiixanaayo.
 - ⇒ La-taliyaha dugsiga wuxuu ogaysiinayaa maamulaha dugsiga si si oo ugu codsado tanaasulaada.
 - ⇒ La-taliyaha dugsiga wuxuu la-tashanayaa oo weydiinayaa qoraal talo-siinta madaxa hay'adda ku haboon iyo talo-siin kana mid ah fikradaha ku saleysan iyo cadeeynta heerka waxqabadka ugu yar goobaha saldhiga u ah xariirka iyo xirfada heerka xisaabinta aqoon gaaritaanka.
 - ⇒ Maamulaha dugsiga wuxuu ogolaan karaa ama diidi karaa ka tanaasulaada ama wuxuuna sameeyn karaa go'aan gaarida ku saabsan codsiga go'aanka fikradaha, maamulaha wuxuu kala xariirayaa ga'aanka ardayga iyo Agaasimaha Guud ee Deegaanka.

Akhbaaraha dheeraadka ah la soo xariir la-taliyaha dugsiga ama u tixraac qoraalka rasmiga ah Degmada K-12 Qoraalka Buuga La-talinta, kaas oo ka turjumaayo isbadalka ugu dambeeyo sharciga qaynuunka iyo siyaasada.

SIYAASADA

Dugsiyadda Dadweynaha Seattle wuxuu bixiyaa Isku Midka Fursadda Waxbarashada iyo Fursadda Shaqaalaynta iyadoo loo fiirinaynin jinsiyada, caqiidada, midibka, diinta, asalkadalka, heerka dhaqaalaha, heerka guurka, muqaalka qofka, dhimirka, jirka ama u dareenkacuryaanimadda. Degmadda waxay raacaysaa dhamaan sharciyada iyo qaynuunka Gobolka iyo Is-bahaysiga Dowladda kana mid ah, laakiin la xadidin Title IX, Title VI Qodobka Xaqa Dadweynaha, Qaybta 504 Qodobka Dhaqan-celinta, RCW 49.60 “Sharciga Ka Soo Horjeedo Kala IYO RCW28A.640 Isla-ega jinsiyada, qarinta laakiin mala xadidin. Dhamaan barnaamijyada, kuusooyinka, waxqabadka, u adeega, helitaanka ama galitaanka dhismayaasha iyo wixii la mid ah. Sargaalka ka wakiilka ah Title IX iyo 504 Xariiriyaha guud wuxuu mas'uul ka yahay qiimeynta, la xisaabtamida iyo hubinta in siyaasada la fuliyey: Office of Equity and Compliance, 2445 3rd Avenue S., Seattle, WA 98124-1165.

